



The Journey Begins Here!

Family Handbook

2024-2025

Authorized by *Friends of Education*, 200 East Lake Street, Wayzata, MN 55391

For general information please call the main office at (612) 843-5050 between the hours of 8:00 a.m. and 4:00 p.m.

Haddii aad doonaysid turjumaad soowac (612) 843-5054. Para ayuda en español marque al (612) 843-5084.

Maxaynu ku faanaa inaynu nahay?

HENNEPIN ELEMENTARY SCHOOL

Maxaynu se halkan u joognaa?

SI AAN WAX U BARANO UNA KOBOCNO

Yaa se mas'uul ka ah guushaada?

**ANNAGAA MAS'UUL KA AH GUUSHAYADA. ANNAGAA
KAANTAROOLNA FICILADAYADA ANNAGAA QAABEYNA MASIIRKAYAGA!**

Sidee se guul lagu gaadhaa?

MAALIN KASTA AYAANU SOO XAADIRNAA OO DEDAALNAA

Sidee se ayaynu isula dhaqanaa?

**WAAN XUSHMEYNAO OO CAAWINAA ARDAYDA FASALKAYAGA & DHAMMAAN
SHAQAALAH DUGSIGA**

Sidee se ayaynu u daryeelnaa dugsiga?

WAXAAN KA DHIGNAA MID AMMAAN & NADIIF AH

Oo haddaba maxaynu sameyn doonaa?

**WAA INAAN WAX DIB UGU CELINAA - QOYSKAYAGA,
ASXAABTAYADA & BULSHADAYADA**

Goormaynu se sameyn doonaa dhammaan waxyaabahan?

MAANTA & BERRI & MAALIN KASTA

Waana maxay Halku-dhiga Dugsigeenu?

HAYAANKU HALKAN AYUU KA BILAABMAA



CAQIIDADA DUGSIGA DHEXE EST. 2018

Yaynu ku faanaa inaynu nahay?
HENNEPIN MIDDLE SCHOOL

Maxaynu se halkan u joognaa?
ISU DIYAARINTA MUSTAQBALKAYAGA

Yaa se mas'uul ka ah guushaada?
ANNAGA!

Sidee se guul lagu gaadhaa?
SOO XAADIRIDA & DEDAALKA

Sidee se ayaynu isula dhaqanaa?
HANWEYNI & XUSHMAD

Sidee se ayaynu u daryeelnaa dugsiga?
WAXAAN KA DHIGNAA MID AMMAAN & NADIIF AH

Oo haddaba maxaynu sameyn doonaa? **WAA**
INAAN WAX DIB UGU CELINAA -
QOYSKAYAGA, ASXAABTAYADA &
BULSHADAYADA

Goormaynu se sameyn doonaa waxyaabahan?
MAALIN WALBA

Waana maxay Halku-dhiga Dugsigeenu?
HAYAANKU HALKAN AYUU KASII SOCDA

ISU IMAATINKA

Inta lagu gudajiro isu-imaatinka, fasal kasta waxa goobta jimicsiga looga diyaariyay kuraas u gaar ah. Anshaxa iyo habdhaqanka habboon ee ardayda ayaa ay darsi doonaan oo ay xoogga saari doonaan macallimiinta kahor barnaamijka isu imaatinka.

SIYAASADA IMAANSHAHA

Waxaan aaminsanahay in imaanshaha joogtada ah ee dugsigu ay muhiim u tahay guusha barnaamijka waxbarasho. Soo kabashada shaqadu ma laba-jibbaarayso koboca fasalka. Ma bixiso fursadaha isdhexgalka iyo wada hadalka ee inta badan muhiimka u ah "wakhtiga waxbarashada."

Waalidka iyo shaqaalaha dugsigu waa inay si wadajir ah u shaqeeyaan si loo hubiyo in ardeydu dugsiga yimaadaan. Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaataan go'aan macquul ah markay ka cudurdaarayaan ilmahooda aadista dugsiga.

HABRAACA IMAANSHAHA IYO MAQNAANSHAHA

Waalidku waa inay ku ogeysiyaan dugsiga wicitaan ahaan ama qoraal ahaan kahor 9:00 a.m. haddii ilmahoodu maqnaan doono maalintaas.

Khadka imaanshaha ee dugsiga hoose waa (612) 843-5050. Khadka imaanshaha ee dugsiga dhexe waa (612) 509-5201. Waalidku waa inay sheegaan magaca ilmaha, fasalka iyo sababta maqnaanshaha. Waad u dhaafi kartaa farriin cod ah.

Ogeysiiska qoraalka ah ama wicitaanka taleefanka waa in loosoo bandhigaa xafiiska markay lagusoo noqdo dugsiga. Ogeysiisku waa inuu taariikhaysan yahay waana inay ku qoran tahay sababta maqnaanshahu. Haddii cadeyn qoraal ah aan lagu helin shan maalmood gudahood marka dugsiga lagu soo laabto, maqnaanshaha ardayga ayaa noqon doona mid aan cudurdaar lahayn.

Soo kabashada shaqada ayaa loo baahan yahay dhammaan shaqooyinkii la seegay maqnaanshaha awgii. Soo kabashada shaqadu ayaa ah mas'uuliyada ardayga, ee ma ahan ta macalinka. Sidaas darteed, waa mas'uuliyadda ardayga inuu la xiriiro macallimiinta si loo go'aamiyo shaqada u baahan in lasoo kabo .

Shaqada seegtay maqnaanshaha awgii waxaa lagu bixin doonaa codsiga waalidku uu u diro xafiiska ardayda maqnaata laba maalmood ama in ka badan. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa inay soo wacaan xafiiska kahor 10:30 a.m. si ay u codsadaan shaqada.

MAQNAANSHAHA CUDURDAARKA LEH

Kuwan soo socdaa waa tusaalooyinka maqnaanshaha cudurdaarka leh:

- Jirro (warqad dhakhtar ayaa loo baahan karaa.)
- Dhimasho ama xanuun daran oo ku timaada qoyska dhow.
- Balamaha caafimaadka ama ilkaha. Mar alla markii ay suuragal tahay, ballamahaas waa in la sameeyo saacadaha ka baxsan saacadaha dugsiga. Haddii aysan suuragal ahayn in ballamaha loo dhigto waqti ka baxsan waqtiga dugsiga, cudurdaar qoraal ah ayaa loo baahan yahay.
- Munaasabadaha diimeed.

Cudurdaar lama siin doono baska dugsiga ee la seego, ballanta timaha, xanaaneynta carruurta, dukaameysiga, taraafikada, iwm.

Cudurdaar qoraal ah oo laga helo waalidiintu **kama dhigayso** maqnaansho cudurdaar leh markasta. Maamulka dugsigu wuxuu xaq u leeyahay inuu markuu doono codsado caddeynta maqnaanshaha ama soo daahida la cudurdaaray inta lagu jiro sannad dugsiyeedka oo dhan.

FASAXYADA QOYSKA

Haddii waalidku u arkaan inay lama huraan tahay inay ardayda uga saaraan dugsiga sababo fasax awgood, codsi qoraal ah waa in loo gudbiyaa xafiiska shan maalmood ka hor.

Shaqada horay ayaa loo codsan karaa, hase yeeshe, waa ikhtiyaarka macalinka fasalka go'aaminta haddii shaqada la bixin doono kahor tagida.

Shaqada loo seego maqnaansho dartiis waa in lagu soo kabaa isla tirada maalmaha la seegay [dugsiga] oo lagu daray hal maalin oo ah [maalinta] ku soo laabashada dugsiga.

DAAHIDA

Kasoo Daahida Dugsiga

Dugsigu wuxuu bilaabmaa 8:45 a.m. Ardaydu way soo daaheen haddii ay yimaadaan dugsiga wixii ka dambeeya 9:05 am

Markay ardaydu kasoo daahdo dugsiga, shaqaalaha xafiisku wuxuu siin doonaa kaar xafiis waxaanuu u diri doonaa fasalka. Xafiisku wuxuu diiwaanka imaanshaha ee ilmaha ku calaamadayn doonaa inuu soo daahay. Saddex daahitaan ayaa u dhigma hal maqnaansho oo bilaa cudurdaar ah.

Daahitaanada ayaa kaliya lagu cudurdaari karaa qoraalka dhakhtarka ama munaasabadaha diinta ama aaska.

Ka Tagista Dugsiga Inta Lagu Jiro Maalinta

Ardayda waxaa looga baahan yahay inay joogaan dugsiga maalinta oo dhan ilaa xafiisku u cudurdaaro mooyee.

HANJABAADA BAMBADA

Qof kasta oo sameeya hanjabaada bambada waxa loo sheegi doonaa mas'uuliyiinta dhabta ah. Tallaabada anshax marinta ayaa ku xigi doonta iyadoo la raacayo xeerka dugsiga.

SAACADAHA IYO ADEEGSIGA DHISMAHA

Dhismaha dugsiga waxa la furi doonaa 8:00 A.M. waxaana la xiri doonaa 4:30 P.M. Ardayda aan waalid ilaaliyaa la joogin looma oggolaan doono dhismaha kahor 8:30 AM ama kadib 4:30 PM

XEERKA MAMNUUCIDA CAGAJUGLEYNTA

UJEEADADA

Hennepin Schools waxay ku dedaalaan inay bixiyaan jawiyo waxbarasho oo nabadgelyo, amaan, iyo ixtiraam leh kuwaas oo loogu talagalay dhammaan ardayda ku jirta dhismayaasha dugsiga, garoomada dugsiga, basaska dugsiga, iyo waxqabadyada dugsiga maalgaliyo. Cagajuglayntu waa dhaqan carqaladeeya awooda ardaygu uu wax ku barto iyo awooda macalinku uu wax ku baro.

Xeerkani wuxuu ardayda ka ilaaliyaa cagajugleynta iyo aargudashada ay kula kacaan ardayda kale.

Xeerkani wuxuu sidoo kale arday kasta oo si iskii ah uga qeybqaata hawlaha ama waxqabadyada degmada qabato ka ilaaliyaa habdhaqanka la mamnuucay, haddii ardaygu qoran yahay degmada iyo haddii kaleba.

Xeerkan waxaa kamid ah si xun u adeegsiga aaladaha elektiroonigga ah iyo barnaamijyada, xitaa marka laga joogo dhismaha dugsiga dibadiisa.

Xeerkan waxaa laga heli karaa buug-gacmeedka ardayga ee dugsiga, xafiisyada dugsiga iyo maamulka degmada, iyo elektiroonig ahaan <http://www.hennepinschools.org>. Xeerka waxa sidoo kale la siiyaa dhammaan shaqaalaha dugsiga, qandaraasleyaasha madaxa-bannaan, iyo mutadawaciinta la shaqeeya ardayda.

QEEXITAANADA

“Cagajugleyntu” waa dhaqanada ula kaca ah ee cabsi gelinta, hanjabaada, aflagaadada ama waxyeelada leh ee uu arday kula kaco hal ama dhowr arday: marka midkood (1) uu jiro ama la arko isku dheelitirnaan la'aan awoodeed oo dhab oo ka dhex jirta dadka ku lugta leh isla markaana falku soo noqnoqdo ama joogto noqdo, (2) habdhaqanku uu si balaadhan iyo weyn u carqaladeeyo fursadaha waxbarasho ee ardayga, hawlqabadka, ama awooda ka qeybqaadashada hawlaha, waxqabadyada ama barnaamijyada dugsiga.

Cagajugleyntu waxay ku saleysnaan kartaa (laakiin kuma koobna) jinsiyadda, qowmiyada, midabka, caqiidada, diinta, asalka wadanka, xaalada socdaalka, jinsiga, xaalada guurka, xaalada qoyska, xaalada dhaqan-dhaqaale, muuqaalka jireed, jinsiga uu ka helo, oo ay ku jirto aqoonsiga jinsiga iyo sheegashada, heerka aqooneed ee la xiriira waxqabadka ardayga, naafanimada, xaalada la xiriirta kaalmada bulshada, da'da, ama astaamaha kale ee qofka ee dhabta ah ama loo maleynayo ee lagu qeexay Xeerarka Minnesota, Cutubka 363A (oo sida caadiga ah loogu yeero Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota). Cagajugleynta siyaasadan waxaa kamid ah “cagajugleynta internetka,” sida hoos lagu qeexay.

"Cagajugleynta internetku" waa cagajugleyn dhacda marka aaladda elektiroonigga ah, - kuwaas oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, kumbuyuutar ama taleefanka gacanta, - loo isticmaalo in lagu gudbiyo calaamad, ishaaro, qoraal, muuqaal, cod ama xog ee ay ku jirto baahinta baraha bulshada boggaga internetka ama fooramyada.

“Dhaqanka cabsi gelinta, hanjabaada, aflagaadada, ama waxyeelaynta” waxaa kamid noqon kara, laakiin kuma koobna, fal ardayga ama hantidiisa u keenaya waxyeelo jireed ama cabsi macquul oo waxyeelayn, ku xadgudbaysa filashada macquulka ah ee asturnaanta ardayga sida uu dhigayo sharciga guud ee Minnesota, ridaysa sumcada ardayga, ama keenaysa xanuujin shucuureed oo ula kac ah ama aargudasho, ama si ula kac ah u sameynta warbixin been abuur ah.

"Habdhaqanka la mamnuucay" macnahiisu waa cagajugleynta ama cagajugleynta internetka sida lagu qeexay qeyb hoosaadkan ama aargudashada sheegida, warbixinta, ama bixinta macluumaadka ku saabsan falka noocaas ah ama u sameynta si ula kac warbixin been abuur ah oo ku saabsan cagajugleyn.

"Tallaabada dhexdhexaadinta" waa tallaabo degdeg loo qaado si wax looga qabto, loo baaro, loo saxo, loogana hortaggo soo noqnoqashada cagajugleynta, taas oo ay ku jirto ilaalinta iyo taageeridda ardayga la cagajugleeyay iyo kuwa gacan iyo taageero siiyay ardayga.

“Dugsi” macnaahisu waa dugsiyada dadweynaha ama kuwa dadweynaha ee jaartarka ah.

“Arday” macnaahisu waa arday ka diiwaangashan dugsi dadweyne ama mid jaartar ah.

HABDHAQANKA MAMNUUCA AH

Cagajugleyntu waa ka mamnuuc:

- Dhismaha dugsiya, gaadiidka degmada dugsiya bixisay, ama meelaha loogu talagalay inay ardaydu ku sugaan gaadiidka degmada dugsiya bixiso.
- Inta lagu gudajiro barnaamij, waxqabad, munaasibad ama safar kasta oo uu maalgaliyo dugsiya.
- Adeegsiya kumbuyuutarada dugsiya, teknoolajiyada elektiroonigga ah, shabakadaha, fooramyada ama liisaska boostada.
- Adeegsiya teknoolajiyada elektiroonigga ah meel ka baxsan dhismaha dugsiya taas oo wax u dhimaysa waxbarashada ardayga ama jawiga dugsiya

Oggolaansha waadaxa ah ama oggolaanshaha uu ardaygu bixiyo macnaheedu maahan in cagajugleynta loo dulqaadan karo ama la oggolaado.

Aargudashada ayaa ka mamnuuc ah arday kasta ama shaqaale degmeed kasta taas oo ka dhan ah qof kasta oo si daacadnimo leh u sheega, eedeeya, ka warbixiya, ama bixiya macluumaad la xiriira dhacdo dhaqan mamnuuc ah. Degmadu waxay ka qaadi doontaa tallaabo ku habboon arday kasta ama shaqaale degmeed kasta oo ku lug yeesha aargudasho. Gudbinta eedeeyn been ah oo cagajugleynta ayaa sidoo kale mamnuuc ah.

JAWAABTA IYO SOO SHEEGIDAHORDHACA AH

Maamulaha Dugsiya

Maamulaha dugsiya ama qofka loo wakiishay ayaa ah qofka mas'uulka ka ah helitaanka warbixinnada cagajugleynta ee heerka dugsiya. Maamulaha/qofka loo xilsaaray wuxuu hubin doonaa in xeerkan iyo habraacyadiisa si caddaalad ah oo dhameystiran loo hirgaliyo una adeegan sidii qofka koobaad ee waxka qabanaya arrimaha xeerka iyo habraaca. Haddii cabashadu ay ku lug leedahay maamulaha/qofka loo xilsaaray, cabashada waxaa loo gudbin doonaa kormeeraha guud.

Ardayda

Ardayda rumeysan in la cagajugleeyay ama arkay cagajugleynta waxaa si xoogan loogu dhiirigelinayaa inay u soo bandhigaan walaacooda maamulaha/ qofka loo xilsaaray laakiin waxay u soo bandhigi karaan walaacooda shaqaale dugsiyeed kasta.

Shaqaalaha Dugsiya

Shaqaale kasta oo goobjoog ka ah dhacdo ama haya macluumaad la isku halleyn karo oo u horseedi kara qofku inuu rumeysto in cagajugleyntu ay dhacday:

- Isla markiiba kala dhexgal si aad u ilaaliso badbaadada ardayga lala beegsaday dhacdada iyo ardayda kale ee ku lugta leh, hadba sidii ku habboon.

- Samee dedaalo macquul ah oo wax lagaga qabanayo laguna xallinayo dhacdada, taas oo ay ku jirto u warbixinta dhacdada maamulaha/qofka oo xilsaaray, hadba sidii loo arko inay munaasib tahay.
- Si buuxda ugala shaqee baaritaanka kasta iyo xallinta dhacdada cagajugleynta.

Qandaraasleyaasha Madaxa-bannaan/Mutadawaciinta

Qandaraasle kasta oo madaxbannaan ama mutadawac kasta oo arka cagajugleyn ama haya macluumaad la isku halleyn karo oo u horseedi kara qofku inuu rumeysto in cagajugleyntu ay dhacday ayaa si aad ah loogu dhiirigelinayaa inay dhacdada cagajugleynta u warbixiyaan maamulaha/qofka loo xilsaaray ama shaqaale dugsiiyeed kasta oo ay si buuxda ugala shaqeeyaan baaritaanka iyo xallinta dhacdada u cagajugleynta. Warbixinnada aan magaca lahayn ayaa uu aqbali doonaa maamulaha/qofka loo xilsaaray. Si kastaba ha noqotee, tallaabada anshax marinta laguma salleyn doono warbixinta aan magaca lahayn oo keliya.

BAARITAANKA

Macluumaadka La Xiriira Dhacdooyinka Cagajugleynta

Adeegsiga, helitaanka, iyo shaacinta macluumaadka la xiriira warbixinnada iyo baaritaannada ku saabsan dhaqanka la mamnuucay waxay ku xiran yihiin sharciyada xogta ee gobolka iyo federaalka. Dugsigu wuxuu ogeysiin doonaa shaqsiyaadka ay dhibaataadu saameysey, kuwaas oo ay ku jiraan ardayda iyo waalidiinta, xuquuqahooda la xiriira macluumaadka la siiyay iyo kuwa uu helay dugsiga, iyadoo la raacayo waajibaaadka sharci ee dugsiga.

Macluumaadka aad siiso degmada ama dugsigu waxay ku xiran tahay Sharciga Dhaqanada Xogta ee Dowladda Minnesota. Sharcigani wuxuu macluumaadka qaar ka dhigaa kuwo lagu heli karo codsiga dadweynaha. Habraaca: Baadhitaanka dhacdo la soo sheegay inay tahay cagajuglayn waa in loo bilaabaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah, laakiin waa in aanay marnaba ka badnaan saddex maalmood oo maalmaha dugsiga kadib marka la helo warbixinta waana in loo dhameystiraa si aan dib dhicin. Diiwaanka baadhitaanka waa in uu ilaaliyaa oo ka warhayaa maamulaha/qofka loo xilsaaray.

Habraaca

Baadhitaanku waa inuu go'aamiyaa haddii dhacdada la soo sheegay ay tahay kiis cagajugleyn. Go'aanku waa inuu tixgeliyaa dhammaan xaqiiqooyinka iyo duruufaha ku xeeran dhacdada, kuwaas oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:

1. Da'da koritaanka iyo heerka bislaanshaha ee dhinacyada ay khusayso.
2. Heerka waxyeelada, duruufaha ku xeeran, iyo nooca habdhaqanka.
3. Dhacdooyinkii hore ama habdhaqanadii hore ama soo noqnoqashadooda
4. Xiriirka ka dhexeeya dhinacyada ay khusayso.
5. Xaalada guud ee dhacdooyinka la sheegay ay ka dhaceen.

Xaaladaha oo dhan, eedaysanahu wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu is difaaco iyo wixii kale ee taageero ah ee ku jira xeerka anshax marinta ee degmada.

TALLAABADA DHEXDHEXAADINTA

Maamulaha/qofka loo xilsaaray ayaa qorsheyn doona isla markaana hirgelin doona tallaabooyinka wax lagu dhexdhexaadinayo si loo saxo loogana hortago dhaqan kale oo mamnuuc ah, si loo ilaaliyo oo loo siiyo taageero dhibanaha cagajugleynta, iyo si loo qaado tallaabo lagu saxayo dhibaatooyinka la xiriira mushkiladaha guud ee diiwaangeshan ee la xiriira cagajugleynta.

Khilaafyo badan oo ardayda ka dhex dhaca ayaa si dhakhso leh loo xallin karaa umana baahna warbixin ama abuurida warbixinta dhacdada. Dugsiyadu waa inay ka jawaabaan cagajuglaynta hab ku haboon dhacdooyinka shaqsiga ah, iyadoo tixgelinaya nooca habdhaqanka, da'da koritaanka ardayga, iyo taariikhda dhaqanada mamnuuca ah iyo hawlqabad ee ardayga.

Markuu ardaygu cagajugleyn sameeyo, dugsiyadu waa inuu adeegsadaa wax ka qabasho heerar kala duwan leh oo shaqsiyeed, joogto ah, macquul ah, cadaalad ah, oo ku habboon darnaanshaha habdhaqanka iyo da'da koritaanka ardayga.

Markay munaasib tahay, degmo dugsiyeedku waxay siin doontaa qofka la bartilmaameedsaday, qof wax sameeyay, iyo shakhsiyaadka kale ee ay dhibaataadu saameysey macluumaad ku saabsan kheyraadka bulshada ee la heli karo si looga caawiyo hanaanka dhexdhexaadinta.

HORUMARINTA XIRFADEED IYO WAXBARASHADA

Shaqaalaha Dugsiga

Degmadu waxay u baahan doontaa in shaqaalaha ay helaan tababaro horumarin xirfadeed oo joogto ah si ay u dhisaan xirfadahooda si ay u fuliyaan siyaasadan. Tababar ayaa looga baahan doonaa shaqaalaha cusub iyo wareegga tababar oo aan ka badnayn hal mar seddexdii sannaba dhammaan shaqaalaha si joogto ah ula shaqeeya ardayda. Nuxurka tababarka waxa kamid noqon doonaa, laakiin kuma koobnaan doono:

1. Istaraatiijiyadaha looga hortagayo, wax looga qabanayo, iyo si waxtar leh loogu joojinayo cagajugleynta qaab koritaan ahaan ku habboon dhacdada.
2. Macluumaadka ku saabsan is dhexgalka adag iyo kala duwanaanshaha awooda ee ka dhex dhici kara fal sameeyaha, bartilmaameedka, iyo markhaatiga cagajugleynta.
3. Natijoooyinka cilmi-baarista ee ku saabsan cagajugleynta, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan qeybaha gaarka ah ee ardayda ee la muujiyay inay si gaar ah khatar ugu jiraan, iyo waxka qabad kasta oo gaar ah oo si gaar ah waxtar ugu leh wax ka qabashada cagajugleynta ku saleysan eexda.
4. Macluumaadka ku saabsan arrimaha badbaadada internetka maadaama ay ula xiriiraan cagajuglaynta.
5. Dib-u-eegida shuruudaha u warbixinta degmada ee la xiriira cagajugleynta.

Ardayda

Dugsiyadu wuxuu dhiirigelin doonaa koritaanka dabecada iyo barnaamijyada kale ee waxbaashada ee koritaan ahaan haboon si looga caawiyo ardayda inay aqoonsadaan, ka hortagaan, iyo yareeyaan cagajugleynta oo ay abuuraan jawi waxbarasho oo badbaado leh. Kormeeraha guud ama qofka loo xilsaaray ayaa go'aamin doona baaxadda iyo muddada cutubyada waxbarashada iyo mowduucyada la dhiganayo laakiin tababarka waxaa ku jiri doona waxbarasho ku saleysan caddeyn, shucuurta-bulsheed si looga hortago loona yareeyo takoorka iyo dhaqanada kale ee aan habboonayn iyo si dhammaan ardayda looga qeybgaliyo abuurista jawi dugsiyeed badbaado iyo taageero leh. Meesha ay ku habboon tahay ilamaha naafada ah, sida ay go'aaminayaan 504-ga ilmaha ama kooxda Barnaamijka Waxbarasho ee La Shakhsiyeeyay (IEP), degmada dugsiyadu

waxay u oggolaan doontaa IEP-ga ama qeybta qorshaha 504 ee ilmuhu inuu wax ka qabto xirfadaha iyo kartida uu ilmuhu u baahan yahay inuu kaga jawaabo ama uusan ku sameyn cagajugleyn.

HABRAACYADA BASKA

Raacida baska dugsigu waa mudnaan ee *MAAHA* xuquuq. Ardayda waxa laga filayaa inay marka ay raacayaan basaska dugsiga ay raacaan heer anshaxeed lamid ah kan laga filayo dugsiga dhexdiisa ama marka la joogo waxqabadyada, howlaha ama dhacdooyinka dugsiga. Dhamaan sharciyada dugsiga ayaa lagu dhaqmayaa inta uu ardaygu korsan yahay baska ama uu taagan yahay goobta joogsiga baska. Qawaaniinta badbaadada baska dugsiga ayaa lagu dhajiyay bas kasta. Intaa waxaa u dheer, ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiintu waxa bilowga sannad dugsiyeed kasta la siin doonaa nuqulka xeerarka baska dugsiga, iyo cawaaqibka ka dhalan kara ku xadgudubka xeerarka. Ka guuldareysiga raacida qawaaniinta ayaa dhalin doonta ka ganaaxida baska.

Haddii ardayga laga joojiyo baska saddex jeer inta lagu gudajiro sannad dugsiyeedka, waxay sababi kartaa in laga xayuubiyo mudnaanta baska inta ka hartay sannad dugsiyeedka.

TALEEFANADA GACANTA

Hennepin Schools ma oggola isticmaalka taleefanada gacanta inta lagu jiro maalin dugsiyeedka (oo ay ku jiraan basasku). Hennepin Schools ma qaadi doonaan mas'uuliyadda lumida ama xatooyada taleefanada gacanta ee ardaydu ay dugsiga keenaan. Ku wadaagista waxyaabaha aan habooneyn taleefanada gacanta ayaa sababi doonta anshax marin, taas oo ay ku jiraan, laakiinse aan ku xaddidnayn, ka ganaaxida dugsiga ama ka ganaaxida baska. Taleefanada gacantu ayaa ay la wareegi doonaan shaqaalaha haddii la isticmaalo, la maqlo, ama la arko inta lagu jiro maalin dugsiyeedka, waxaana keliya loo celin doonaa waalidiinta kadib markay la kulmaan shaqaalaha ama maamulaha dugsiga. Dembiga ugu horeeya, xubinta shaqaalaha ahi wuxuu taleefanka geyn doonaa xafiiska ardayguna wuxuu qaadan karaa taleefankiisa dhammaadka maalinta. Dembiga labaad, taleefanka waxa laga geyn doonaa xafiiska waxaanay noqon doontaa in waalid/mas'uul uu yimaado dugsiga si u qaado taleefanka waxaana kaliya la siin doonaa waalidiinta kadib markay la kulmaan shaqaalaha ama agaasimaha dugsiga.

ANSHAX MARINTA

HS waxay qiimeysaa PRIDE

Waxaan u tusaaleynaa PRIDE ardaydeena iyo dhexdeena-- maalintii oo dhan, maalin kasta.

- **Diyaargarowga**
 - Wakhtiga ilaali
- **Mas'uuliyadda**
 - Isla xisaabtan
- **Daacadnimada**
 - Xaadir ahow
 - Qiimee iskaashiyada adigoo adeegsanaya isdhexgal anshax leh
- **Rabitaanka**
 - Noqo qofka ugu fiican ee aad awoodo inaad noqoto maalin kasta

- **Heersarreynta**

- Xushmad samee
- Filo warcelin iyo ammaan

Xeer kayaga anshax marinta ee gaarka ahi waa sidan soo socota:

Adiga ayaa mas'uul ka ah habdhaqankaaga iyo ficiladaada.

Yoolka ugu weyn ee dugsigani waa waxbarashada; sidaa darted, cid kasta oo carqaladeysa ama dadka kale kahor istaagta gaadhista yoolkan anshax marin ayaa lagu sameyn doonaa. Waxaana la qaadi doonaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si loo saxo dhibaataada. Ardayda dedaala ama si fiican u dhaqma ama ficiladoodu wanaagsan yihiin waxay heli doonaan dhibco abaalmarin ah, waxaana taas go'aan ka gaadhaya macalinka.

Hennepin Schools waxay adeegsadaan nidaam dhibceed si ay u abaal mariyaan habdhaqanka ardayga. Maalin kasta, ardaydu waxay kasbadaan dhibco markay buuxiyaan filashooyinka wax barashada. Ardaydu waa inay kasbadaan dhibco si ay uga qeyqaataan mudnaanaha gaarka ah sida wakhtiga ikhtiyaarka ama Fun Friday.

U gudbinta anshax marinta ayaa la adeegsadaa si uu u sheego tafaasiisha dhacdo gaar ah shaqaalaha xaadirka ahi, waxaana loo gudbiyaa maamulka waxaana lagu daraa diiwaanka ardayga. Xogtan shakhsiga ah lalama wadaagi doono qoysaska kale, marka laga eego ardayga la gudbiyay mooyeee. Tallaabada anshax marinta waxa go'aamiya maamulka u sheegida qoysaskuna waxay ku xigi doontaa marka la dhammeystiro baaritaanka.

Habdhaqanadan ama ficiladan soo socdaa waxay sababi doonaan u gudbinada anshax marinta:

**Shaxda Isbarbardhiga
Habdhaqanada Xun ee
Yaryar iyo Kuwa
Waaweyn**

Habdhaqanada xun ee yaryar – waxa wax lagaga qabtaa fasalka gudihiisa.
Habdhaqanada xun ee waaweyn– waa mid daran oo dhalisa u gudbinta maamulka.

Habdhaqanada Xun ee Yaryar	Habdhaqanada Xun ee Waaweyn
Adeecid la'aan	Luqad aflagaado ah/aan habooneyn/cay/wax gubid/hanjabaad bam gareyn/digniin been ah (false alarm)
Xushmad daro	Cagajugleyn
carqaladeyn	Adeecid la'aan/diidmo/u hoggaansami la'aan

Ku xadgudubka tiknoolajiyadda
Luqad aan habooneyn
Taabasho jireed/Gardaro (aan darnayn)
Si xun u adeegsiga hantida
Mid kale

Xushmad daro
carqaladeyn
Adeegsiga/heysashada hubka
Dagaalanka
foorjari/tuuganimo/xatooyo
dhibaateyn
Been sheegid/khiyaamid
Gardaro (marka dhaawac jiro)
Waxyellaynta/burburinta hantida

Sababaha ganaaxida ama eryida waxaa ka mid noqon kara, laakiin kuma xaddidna:

1. Xatooyo
2. Gacan qaad
3. Dagaal
4. Burburinta hantida
5. Kadeedis/Cabsi gelin
6. Hub
7. Ixtiraam la'aanta shaqaalaha
8. Heysashada ama adeegsiga tubaakada/daroogada

Haddii ardayga laga joojiyo dugsiga saddex jeer inta lagu gudajiro sannadka, waxay sababi kartaa eryid. (Dhammaan ganaaxyadu waxay noqon doonaan kuwo waafaqsan Sharciga Eriga Caddaalada ah ee Ardayga ee 1974, sec. 127.26-27.)

U CARBINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH - DABKA IYO CIMILO XUMADA

U carbinta dabka (5) iyo u carbinta cimilo xumada (1) ayaa la qaban doonaa muddooyin kala duwan inta lagu jiro sannadka. Waa muhiim inaad dhayalsan carbintan oo aad taqaano hanaanka la raacayo haddiiba ay dhacdo xaalad degdeg ah oo dhab ahi.

Waa inaad ogaataa marinka bixitaanka ee aad isticmaalayso mid kasta oo kamid ah fasaladaada. Macalimiintaada ayaa kaala hadli doona habraacyda daadgureynta bilowga sannad dugsiyeedka.

DARAJA-BIXINTA

HES:

- ★ Ka sareeya (E) = 90-100%
- ★ Buuxiyay (M) = 75-89%
- ★ Qeyb ahaan Buuxiyay (PM) = 60-69%
- ★ Aan Buuxin (DNM) = 59-0%

HMS:

- ★ A = 90-100%
- ★ B = 80-89%
- ★ C = 70-79%
- ★ D = 60-69%
- ★ F = 59-0%

Ardayda waxa laga filayaa inay shaqada ku soo gudbiyaan wakhtigii loogu talagalay. Eeg Siyaasadda Shaqada-guriga.

KADEEDISTA IYO RABSHADA

Dhammaan dadka dhigta Hennepin Schools waxay xaq u leeyihiin inay dareemaan ixtiraam iyo amaan. Sidaa darteed, waxaan rabnaa inaad wax ka oggaato xeerkeena si looga hortago kadeedista iyo rabshadaha nooc kasta leh ee ku saleysan jinsiyada, diinta, ama jinsiga.

Rabshoolahu wuxuu noqon karaa arday ama qof weyn. Kadeedista waxa kamid noqon kara, laakiin kuma xaddidna waxyaabaha soo socda markii ay la xiriirto diinta, jinsiyada, ama jinsiga:

1. Magac ugu yeerista, kaftanka, ama xanta, loo sameeyo si fool ka fool ah ama lagu sameeyo onlayn
2. Jiidida dharka
3. Gidaar wax ku sawirista/qorista
4. Qoraalada ama kartoonaada
5. Taabashada aan la rabin ee la taabto qofka ama dharka
6. Waraaqaha sawirada leh ama jaldiyada buugga ee aflagaadada ah

Haddii wax erey ama ficil ahi uu ku dareensiinaayo nafis daro ama cabsi, waxaad u baahan tahay inaad u sheegto macallin ama agaasimaha dugsiga.

Waxaad kaloo sameyn kartaa warbixin qoraal ah. Waa in loo dhiibaa macalin ama agaasimaha dugsiga.

Xuquuqdaada asturnaanta ayaa la ixtiraami doonaa intii suurtagal ah.

Ma dhayalsano dhammaan warbixinada kadeedista ama rabshada ee ku saleysan diinta, jinsiyada, ama jinsiga waxaanan qaadi doonaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon ee ku saleysan warbixintaada.

Hennepin Schools ayaa sidoo kale qaadi doonta tallaabo hadii cidi isku daydo inay ku cabsi galiso ama ay qaado tallaabo ay kugu dhaawaceyso iyadoo ay sababtu tahay soo sheegida xaalada. Xeerarka oo dhameystiran ayaa laga heli karaa xafiiska agaasimaha dugsiga markii la codsado.

MAMNUUCIDA KU DHEEL-DHEELIDA

Ujeeddada xeerkani waa in la jooqteeyo jawi waxbarasho oo badbaado u leh ardayda iyo shaqaalaha, kana xor ah ku dheel-dheelida. Falalka ku dheel-dheelidu nooc kasta oo ay yihiinba waa kuwo lidi ku ah yoolalka waxbarasho ee Hennepin Schools waana la mamnuuc dhammaan wakhtiyada.

"Ku dheel-dheelid" macnaheedu waa ku kacitaanka fal ka dhan ah arday, ama ku khasbida arday inuu ku kaco fal u horseedaya khatar ama waxyeelo weyn, si ardayga loogu daro ama uu qeyb uga noqdo urur ardayeed, ama ujeeddo kasta oo kale.

Arday, macallin, maamule, mutadawac, qandaraasle, ama shaqaale kale oo ka tirsan Hennepin Schools ma qorshayn karo, hagi karo, dhiirigelin karo, gargaari karo ama ka qeybqaadan karo ku dheel-dheelid.

Macalin, maamule, mutadawac, qandaraasle ama shaqaale kale oo kasta oo ka shaqeeya Hennepin Schools ma oggolaan doono, aqbali doona ama u dulqaadan doono ku dheel-dheelida.

Aqbalaada ama oggolaanshaha muuqda ee uu bixiyo qofka lagu dheel-dheelayo ma yareynayso mamnuucida ku jirta xeerkan.

Xeerkani wuxuu khuseeyaa habdhaqanka ka dhaca gudaha ama dibada dhismaha dugsiga iyo inta lagu jiro iyo kadib saacadaha dugsiga.

Qofka ku kaca tallaabo ku xadgudbta xeerka ama sharciga dugsiga si loogu daro ama uu uga mid noqdo urur ardayeed ayaa lagu sameyn doonaa anshax marin falkaas uu sameeyay awgii.

Hennepin Schools waxay baari doonaan dhammaan cabashooyinka nacaybka waxayna anshaxa marin doonaan ama tallaabo munaasib ah ka qaadi doonaan arday, macalin, maamule, mutadawac, qandaraasle ama shaqaale kale oo kasta oo dugsiga ka shaqeeya oo lagu helo inuu ku xadgudbay siyaasadan.

ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Adeegyada caafimaadku way u furan yihiin dhammaan ardayda dhigata Hennepin Schools. Ardayda waxaa looga baahan yahay inay adeegyada xafiiska weyn u isticmaalaan daryeelka shilalka, xanuunka, ama dhibaataada caafimaad. Arday kasta waa inuu xasuusnaadaa inuu u soo sheego nooc kasta oo shil ah qof ka mid ah maamulka dugsiga.

Markay ardaydu caafimaad daro dareemaan, waxay u baahan yihiin inay gurigooda joogaan haddii ay qabaan astaamaha ay kamid yihiin xumad, shuban, matag, iwm. *Waa inay guriga joogaan ilaa iyo inta ay ka maqnaayeen astaamahaasi ugu yaraan 24-72 saacadood iyadoon la isticmaalin daawooyinka xumada jebiya.* Dugsiga ayaa sameyn doona go'aanka kama dambaysta ah isla markaana wuxuu xaq u leeyahay inuu ardayga u diro guriga iyadoo lagu saleynayo buuxin la'aanta shuruudaha adeegyada caafimaadka iyo haddii uu u qalmo.

Ka saarida dugsiga waxay u baahan tahay in si dhakhso leh loola tacaalo si ilmuhu u helo daryeel caafimaad oo habboon. Ardayda ayaa ku laaban kara dugsiga kadib marka uu dhakhtar amar ku bixiyo sidaa, ardayguna uu sito qoraalka dhakhtarka. Ka saarida waxaa ku jira astaamaha: COVID19, Boronkiitada, Busbuska, Indho-casaan, Cudurka Gacmaha, Cagaha, Afka, Injirta Madaxa, Caaquba Maqaarka, Hargabka, Jadeecada, Xiiq-dheerta (Xiiqdheerta), oof-wareenka, Cambaarta, iyo Cune-xanuunka.

SIYAASADDA SHAQADA-GURIGA

I. UJEEDDADA

Shaqada-gurigu waxay gacan ka geysataa dhisida mas'uuliyadda, is-edbinta iyo caadooyinka barashada ee nolosha oo dhan. Waa ujeeddada shaqaalaha Hennepin Schools inay u diraan ardayda shaqooyin-guri oo ku habboon, adag, macnana leh kuwaas oo xoojiya ujeeddoyinka barashada fasalka. Shaqada-gurigu waa inay siisaa ardayda fursad ay ku adeegsadaan macluumaadka ay barteen, ku dhammeystiraan laylisyada aanay dhammeystirin, kuna kobciyaan madaxbannaanida.

Laylisyada shaqada-guriga waxa kamid ah:

- ☆ Laylisyada **ku tababarashada** ah si ay u raacaan tilmaamaha fasalka
- ☆ Laylisyada **fanqeynta** ah si ay ugu diyaargaroobaan casharada xiga
- ☆ Laylisyada **dheeraadka** ah si ay ugu adeegsadaan xirfadaha ama fikradaha cusub xaalado cusub
- ☆ Waxqabadyada **hal-abuurka** ah si loogu daro xirfado badan soo saarida jawaab ama natiijo

II. WAKHTIGA

Wakhtiga dhabta ah ee loo baahan yahay in lagu dhammeystiro laylisyadu waxay ku kala duwanaa doonaan caadooyinka waxbarasho iyo xirfadaha tacliimeed ee arday kasta. Ardaydu waa inay fishaan inay heli doonaan shaqo-guri oo ah labaatan daqiiqo illaa saacad oo lagu qabanayo guriga habeen kasta. Haddii ilmuhu wakhti xad-dhaaf ah ku qaato shaqada-guriga, waxaan ku tallinaynaa in waalidku la xiriiro macallimiinta dugsiga. Ardayda waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay sameeyaan wax akhriska aan loo dirin, madaxbannaan, ee wakhtiga firaaqada ah.

III. SIYAASADDA LA DAAHIDA SHAQADA

Ardayda waxa laga filayaa inay shaqada ku soo gudbiyaan wakhtigii loogu talagalay. Ardayda si joogto ah ula soo daaha laylisyadu waxay heli doonaan mid kamid ah waxyaabahan soo socda iyadoo lagu saleynayo ikhtiyaarka macallinka ama siyaasadda fasalka.

1. siinta qeyb kamid dhibcaha
2. siin la'aanta dhibcaha
3. seegida waxqabadka abaalmarinta ah
4. la xiriirida waalidka

Ardayda u seega shaqada-guriga maqnaansho awgii waxay heli doonaan fursad ay ku buuxiyaan shaqadii ay seegeen. Ardayda waxa la siiyaa hal maalin mar kasta oo ay maalin maqnaadaan iyo hal maalin oo dheeraad ah oo ay shaqadooda ku soo gudbiyaan. Waa mas'uuliyadda ardayga inuu qaato shaqada uu u seegay jirro ama maqnaansho awgii.

IV. MASHAARIICDA WAAWEYN

Mashaariicda Waaweyn waxa kamid ah warbixinnada cilmi-baarista, warbixinnada buugga, maqaallada waaweyn, iyo laylisyada kale ee ay macallimiintu u qoondeeyaan inay yihiin mashaariic waaweyn. Ka shaqeynta mashaariicdani waxay ka badnaan karaan daqiiqadaha loo qoondeeyay habeen kasta.

Wajibbaadka Waalidka:

1. Samee wakhti waxbarasho joogto ah oo aan carqalad lahayn maalin kasta
2. Samee goob waxbarasho oo degan, iftiin fiicana leh
3. La soco abaabulka ardayga iyo liistada maalinlaha ah ee laylisyada
4. Ka caawi ardayga inuu ka shaqeeyo helitaanka jawaabta, oo aanuu kaliya dhammeystirin uun
5. Taageer marka ardaygu ka cadhoodo laylisyada adag
6. La xiriir macallinka si aad si fiican ula socoto hanaanka waxbarashada ardayga

Mas'uuliyaddaha Ardayda:

1. Xaqiiji in dhammaan laylisyadu cad yihiin; ha ka baqin inaad su'aalo weydiiso haddii loo baahdo.
2. Wakhti joogto ah u qoondee waxbarashada.
3. Raadso goob waxbarasho oo degan, iftiina leh.
4. Uga shaqee shaqada-guriga si madaxbannaan mar kasta oo ay suurtoagal tahay, si ay u muujiso kartida ardayga. Samee shaqo tayo leh.
5. Xaqiiji in laylisyada lagaga shaqeeyo wakhtigii loogu talagalay iyo si waafaqsan tilmaamaha lagu siiyay.

Dhammaan fasalada K-8 waxay maalin kasta guriga u diri doonaan shaqada-guriga ee maaddooyinka kala duwan ee la bixiyo. Fasalada 1-8, laylisyadan waxaa lagu qori doonaa qorsheeyaha ardayga.

Akhriisku aad buu muhiim ugu yahay guusha ardayga. Ardayda K-2 waxa lagu dhiirrigelinayaa inay wax akhriyaan 15-20 daqiiqo maaliintii; fasalada 3-8 iyagana waxa lagu dhiirrigelinayaa 30-45 daqiiqo maalin kasta.

SIYAASADDA ADEEGSIGA INTERNETKA

Helitaanka Internetku waa mudnaan ee **maaha** xuquuq. Kombiyuutarada, aagagga kaydinta kumbuyuutarrada iyo cajaladaha ayaa ah mi(U)lkiyadda dugsiga, saraakiisha ayaana dib u eegi kara feylasha iyo isgaarsiinta si loo hubiyo in isticmaaleyaashu ay ku howlan yihiin waxqabadyo mas'uuliyad leh. Dugsigu wuxuu leeyahay tallaabooyin lagu xakameynayo in carruurta yaryari ay helaan waxyaabaha waxyeelada u leh. Galida qalabka aan amarkooda la haysan, jabsashada, iyo/ama howlaha kale ee sharci darrada ah ee ay ku sameeyaan carruurta yaryari onlayn, waxay dhaliin doontaa tallaabo anshax marin ah oo u dhaxeysa luminta mudnaanta ilaa xiritaan/ganaaxid/eryid waxaana suurogal ah in tallaabo sharci ah ay qaadaan maamulku. Dhammaan carruurta waxaa loo oggolaan doonaa galaan internetka. Haddii waalidku/mas'uuliyiintu rabaan inay ka laabtaan galitaankooda, fadlan qoraal ugu sheeg maamulaha dugsiga.

DAAWADA

Dhammaan daawooyinka ay qaataan ardayda inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka waa in la siiyaa iyada oo la raacayo tilmaamaha xafiiska caafimaadka dugsigaama qofka loo xilsaaray loona tababaray inuu qabto adeegyada caafimaadka, iyo iyadoo la raacayo Sharciga Gobolka Minnesota iyo Xeerka Guddiga Dugsiga. Daawooyinka dhakhtarku qoro lama siin karo iyada oo aan la helin: (1) amar qoraal ah oo dhakhtar/daawo qore shati caafimaad heysta iyo (2) oggolaanshaha qoraalka ah ama ka afka ah ee waalidka/mas'uulka sharciga ah ee ardayga. Haddii oggolaanshaha waalidka/mas'uulka sharciga ah uu yahay af, kadib oggolaanshaha afka ah waa in loo beddelo qoraal laba maalin dugsiiyeed gudahood. Daawooyinka la qoro waa in la siiyaa oo uu qaataa kaliya qofka loo qoray daawada.

WAA IN *la buuxiyaa* Foomka Daawo Siinta ee daawada la qoray. Dhammaan daawooyinka ardaydu WAA INAY yihiin kuwo cusub oo si cad loogu qoray magaca ardayga, macluumaadka lagala xiriirayo dhakhtarka, isla markaana uu la socdo diiwaanka caafimaadka ee bixiyahaaga caafimaad.

Marnaba looma oggola ardaydu inay sitaan dawooyinka loo qoro nooc kastaba ha ahaadeene. Dhibic-dhibicda qufaca ama daawada dibnaha ayaa uu macalinku iskii u oggolaan doonaa, haddii aysan faragalin ku sameyneyn jawiga barashada.

HABRAACA QADADA DUHURKII

Qadooyinka oo dhan, ha ahaadeen kuwa kulul ama qadada bacda lagu soo ritaba, waa in lagu cunaa kafateeriyada ama meel kale oo ay ugu talagaleen macallimiintu. Haddii ilmahaagu qabo xasaasiyad cunto, fadlan hubi inaad la socodsiiiso kaaliyaha kalkaalisada dugsiga, xafiiska dugsiga, iyo macallinka ilmaha.

Habdhaqanada qaarkood lama aqbali karo. Kuwaas waxaa kamid ah: tuurida iyo tufista cuntada, qaylinta, ordida, turaan-turaysiinta ama riixida dadka kale, ixtiraamid la'aanta shaqaalaha dugsiga, diidmada inaad raacdo amarada kormeerayaasha kafateeriyada, ama inaad miiska ama sagxadda oo khariban ka tagto. Ardayda jebiya qawaaniinta qolka qadada waxaa lagu sameyn doonaa anshax marin waxaana laga xayiri doonaa kafateeriyada.

Markay ardaydu wax cunaan kadib, waa inay ku sugnaadaan kafateeriyada ilaa uu macallinku ka saarayo. Ardayda looma oggola inay ka baxaan dhismaha dugsiga inta lagu jiro xilliga qadada.

AALADAHA QASKA

Waxyaabaha keliya ee ardayda loo oggol yahay inay dugsiga keenaan waxaa kamid ah boorsada dhabarka, buugaagta dugsiga, alaabada dugsiga, tiknoolajiyadda dugsiga, caagadaha biyaha iyo dharka dheeriga ah ama kabaha jimicsiga. Raadiyeyaasha, iPod-yada, DVD-yada/CD-yada, ogeysiiyayaasha, tilmaamayaasha leysarka ah, qalabka dhegaha la gashado, Gameboys iyo cayaaraha kale ee elektiroonigga ah, iskeytyada, kabaha taayirada leh, kamaradaha, boombalada, taleefanka gacanta, iyo waxyaabaha kale ee aan ujeedada lahayn ee ay dejiyeen agaasimaha fulinta ama agaasimayaasha dugsigu looma oggola dugsiga. Dugsigu mas'uul kama aha luminta ama xatooyada waxyaabahan inta la joogo dhismaha dugsiga.

KAARARKA WARBIXINADA

Kaararka warbixinta waxaa la soo saari doonaa laba jeer sanNadkii. Sixitaanada ay sameeyeen macallimiintu waxay qayb ka noqdaan diiwaanka joogtada ah ee dugsiga waxayna matalaan xukunka macallinka ee ugu wanaagsan. Darajeyntan waxaa maalin kasta laga sameeyaa hawlqabadka ardayga, imtixaannada gaagaaban, iyo natiijooyinka imitixaanada cutubka iyo ka kama dambeysta ah,

Macallimiinta shaqsiyadeed ayaa guriga u soo diri doona warbixinno hormarineed oo dheeraad ah mararka qaarkood. Waalidka/mas'uuliyiinta waa la soo dhaweynayaa inay dejiyaan waqti ay ku yimaadaan dugsiga oo ay horumarka ardayga ugala hadlaan macallimiinta iyo/ama maamulaha dugsiga waqti kasta inta lagu

jiro sanad dugsiyeedka. Warbixin shaqsiyeedka maalinlaha ah, qoraalada ama wicitaanka taleefanka ayaa lala sameyn karaa macalinka fasalka.

MAAMULKA DUGSIGA

Dhammaan shaqaalaha Hennepin Schools waxay leeyihiin masuuliyada iyo awooda ay ku hirgeliyaan qawaaniinta dugsiya. Kuwan waxaa kamid ah: agaasimaha fulinta, agaasimeyaasha dugsiya, macallimiinta, maamuleyaasha xafiiska, kalkaaliyayaasha, shaqaalaha maktabadaha, kariyayaasha, ilaaliyayaasha, wadayaasha basaska, kaaliyayaasha waxbarashada, iyo qof kasta oo kale oo u shaqeeya dugsiya.

XIRIDA DUGSIGA EE LA XIRIIRTA CIMILO XUMADA

Haddii la go'aansado in dugsiyo dib loo dhigo ama la xiro cimilo xumo darteed, waxyaabaha soo socda ayaa dhici doona:

1. Dugsiya ayaa go'aan gaari doona 6:00 aroornimo in haddii uu dugsiya dib loo dhigi doono ama la joojin doono.
2. Waalidiintu waa inay dhageystaan KARE 11, WCCO TV (Channel 4), ama KSTP TV (Channel 5). Dugsiyo wuxuu sidoo kale u diri doonaa dhammaan qoysaska wicid taleefan oo otomaatig ah, iyadoo adeegsanaya nidaamkayaga taleefanka ee otomaatiga ah, 6-da aroornimo, haddii dugsiya la xiri doono ama basaska dib loo dhigi doono.

DIREYSKA DUGSIGA

Ardayda waxaa looga baahan yahay inay yimaadaan dugsiya iyadoo ku labisan direys nadiif ah, kaawiyadaysan, oo xaaladoodu wanaagsantay. Lagama oggola dugsiya dhar cidhiidhi ah ama jirka ku dhagsan. Dharka oo dhan waa inay si muuqata ugu qoran yihiin magaca ardaygu.

SHAADHADHKU WAA INAY AHAADAAN CASAAN RASIIN AH, WAXAANA LA XIDHAN KARAA IYAGOO LEH AMA AAN LAHAY SUMADDA HENNEPIN SCHOOLS

- ☆ Garan gacmo-dheere ama gacmo-gaab ah iyo/ama Funaanadaha HS ee ay wax ku qoran yihiin
- ☆ Garan bilaa raqabad ah oo gacmo gaab ama gacmo dheer ah
- ☆ Garanka qoorta dheer
- ☆ Funaanad Funaanad iyo/ama Funaanadaha Dugsiya Sare ee ay wax ku qoran yihiin

Tilmaamaha soo socda waa in la buuxiyaa si ardaydu u kasbadaan dhibcdooda/xiddigtooda maalinlaha ah.

- Garamada hoosta laga xidho ee muuqdaa waa inay noqdaan casaan rasiin ah, buluu maaree, madow ama cadaan.
- Si fiican loo hoos galiyay surwaalka

SURWAALADU WAA INAY AHAADAAN BULUU MAREE AMA MADOW OO AANAY LAHAYN MIDABO KALE, LAYMAN IYO/AMA QORAALO

- ☆ Surwaalada cinjirlaha ah iyo kuwa isboortiga ee isku jooga ah, oo aan lahayn layman cadaan ah ama midabo kale
- ☆ Toobka gaaban ee direyska ah
- ☆ Surwaal gab

Tilmaamaha soo socda waa in la buuxiyaasi ardaydu u kasbadaan dhibcdooda/xiddigtooda maalinlaha ah.

- Surwaalada waa in lagu xirtaa dhexda, waa INAANAY laalaadmin.
- Surwaaladu ma yeelan karaan jeebado dusha sare ku dhajisan, liidad ama midabyo kale oo qurxin(AH)
- Jiinisyada dhejiska ah/Jiinisyada caadiga ah lama ogola

FUNAAANADAHA/FUNAAANADAHA SHAADHKA LAGA DUL XIDHO AYAA LA XIDHAN KARAA WAKHTIGA QABOBAHA

- ☆ Funaanadahu waa inay noqdaan casaan rasiin ah ama buluu maaree
- ☆ Funaanadaha iyo jaakeedada direyska ah ee jeebada leh ayaa la xiran karaa inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka.
- ☆ Funaanadaha koofiyada madaxa leh iyo/jaakeedada lama oggola inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka.

Tilmaamaha soo socda waa in la buuxiyaa si ardaydu u kasbadaan dhibcdooda/xiddigtooda maalinlaha ah.

- Funaanadaha koofiyada madaxa leh iyo/jaakeedada lama oggola inta lagu jiro maalin dugsiiyeedka.
- Alaabada aan direyska ahayn, sida funaanadaha koofiyada madaxa leh ama funaanadaha aan direyska ahayn, waa in la iska saaraa markuu ardaygu yimaado fasalka, oo lagu rido boorsada ardayga ama katabaanka koodhadhka ilaa iyo dhamaadka maalinta.

KABAHA/SHARBAADADA

- ☆ Kabahu waa inay xaga hore ka xidhan yihiin; kabaha sandhalka ah lama oggola
- ☆ Kabaha hoostoodu aanay wax xoqayn ee lagu giijiyo tax si wanaagsan loo xiray
- ☆ Kabaha kubada tenista ayaa loo baahan yahay si ay looga qeybqaato Waxbarashada Jimicsiga
- ☆ Sharaabaadada, dhejisyada ama cago gashiga muuqdaa waa inay noqdaan buluug maaree, madow ama caddaan

Tilmaamaha soo socda waa in la buuxiyaasi ardaydu u kasbadaan dhibcdooda/xiddigtooda maalinlaha ah.

- Kabaha buudhka ah lama xiran karo inta lagu jiro maalinta
- Kabaha ciribta leh waa ineysan ka dheerayn 2 hiish
- Jiinisyada dhejiska ah/Jiinisyada caadiga ah lama ogola

WAA IN LA RAACAA TILMAAMAHA TIMAHA/WAXYAABAHA LA XIDHO EE LA ISKU QURXIYO SI ARDAYDU U KASBADAAN DHIBICDOODA/XIDIGTOODA MAALINLAHA AH

- ☆ Timahu waa inay feedhan yihiin.
- ☆ Agaasimaha dugsiga ayaa go'aan ka gaari doona dhammaan go'aannada kama dambeysta ah ee la xiriira shuruudaha timaha.
- ☆ Dhegaha dhererkoodu ka yar yahay hal hiish; lama oggola waxyaabaha kale ee la gashado wajiga ama jirka.

QEYBTA 504/QORSHAHA WAXBARASHADA SHAKHSIYEED: XUQUUQDA WAALIDKA/MA'SUULKA & ARDAYGA

Waxyaabaha soo socdaa waa sharaxaada ku saabsan xuquuqda uu sharciga federaalka siiyay ardayda leh qorshayaasha 504 ama Qorshayaasha Waxbarashada Shakhsiiyeed (IEPs). Ujeeddada sharciga ayaa ah in si buuxda lagu wargeliyo wixii ku saabsan go'aannada la xiriira ilmahaaga iyo in aan kugu wargelino xuquuqahaaga haddii aadan ku raacsaneyn go'aannadaas midkood.

Waxaad xaq u leedahay in:

- Ilmahaagu ka qeybqaato oo uu helo dheefaha barnaamijyada waxbarashada dadweynaha iyadoon loo takoorin sababo la xiriira xaaladdiisa naafonimo;

- Dugsiga degmadu kaala taliyo xuquuqdaada sharciga federaalka;
- Hesho ogeysiis la xiriira aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta ilmahaaga;
- Ilmahaagu helo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah, kuna habboon. Tan waxaa kamid ah xuquuqda in wax lagula baro ardayda kale illaa iyo inta ugu badan ee habboon. Waxa kale oo ku jira xuquuqda in degmadu ay sameyso qaabilaado macquul ah si ay ugu saamaxdo ilmahaaga inuu helo fursad isku mid ah oo uu kaga qeybqaato dugsiga iyo waxqabadyada dugsiga la xiriira;
- Ilmahaaga wax lagu baro xarumaha oo uu helo adeegyo la mid ah kuwa la siiyo ardayda kale;
- Ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha haddii isaga/iyada loo aqoonsado inuu isagu xaq u leeyahay marka la eego Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah (PL 101-476) ama Qeybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta;
- Uu helo go'aanada qiimeynta, waxbarashada, iyo meelaynta oo lagu salaynayo ilo macluumaad oo kala duwan, isla markaana ay sameynayaan shakhsiyaadka garanaya ardayga, taariikhda qiimeynta, iyo ikhtiyaarada meeleynta;
- La siiyo gaadiid keena kana qaada goob meelayn oo beddel ah iyadoon kaaga imanaynin kharash ka badani haddii ardayga lagu meeleyn lahaa barnaamij ay degmadu maamusho;
- Ilmahaaga la siiyo fursad loo siman yahay si uu uga qeybqaato waxqabadyada tacliinta ahayn iyo kuwa manhajka ka baxsan ee ay bixiso degmadu;
- Baadho dhammaan diiwaannada la xiriira go'aamada khuseeya aqoonsiga, qiimeynta, barnaamijka waxbarasho, iyo meeleynta ilmahaaga;
- Ku helo nuqullada diiwaannada waxbarasho qiime macquul ah ilaa ay khidmaddu kuu saamixi weydo inaad hesho diiwaannada; inaad degmo dugsiiyeedka ka hesho jawaabta codsiyada macquulka ah ee la xiriira sharaxaadda iyo tarjumaadda diiwaannada ilmahaaga;
- Codsato waxka beddelida diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu rumeysan karo inay khaldan yihiin, marin habaabin dhalinayaan amaba haddii kale xadgudub ku yihiin xuquuqaha asturnaanta ee ilmahaaga. Haddii degmada dugsigu ay diido codsigan wax ka beddelka, waxay kugu soo ogeysiin doontaa waqti macquul ah waxayna ku wargelin doontaa xuquuqda aad u leedahay dhageysi;
- Codso dhexdhexaadin ama dhageysi eex-la'aan ah oo la xiriira go'aamada ama ficillada khuseeya aqoonsiga, qiimeynta, barnaamijka waxbarasho ama meeleynta ilmahaaga. Adiga iyo ardaygu waad ka qeybqaadan kartaan dhageysiga, qareena wuu idin matali karaa. Codsiyada dhageysiga waxaa laga sameyn karaa Isu-duwaha Waxbarashada Gaarka ah;
- Codso bixinta khidmadaha qareenka ee macquulka ah haddii aad ku guuleysato sheegashadaada (dacwadaada);
- Xareyso cabasho deegaanka ah.

MACLUUMAADKA ARDAYGA EE LA DAABACO

Macluumaadka ardayga ee la daabaco waxaa kamid ah (laakiin kuma xadidna) keydka liiska ardayda, sawirada iyo magacyada ardayda heshay abaalmarino kana qeybqaatay waxqabadyada fasalka iyo kuwa manhajka ka baxsan. Kuwan waxaa lagu daabaci karaa joornaalada maxalliga ah, daabacaadaha degmada dugsiga waxaanalagu muujin karaa samuuradaha ogeysiiska iyo bandhigyada kale ee aqoonsashada. Haddii aanad rabin in magaca ilmaha ama sawirkiisa loo isticmaalo ujeedooyinkan, fadlan la xiriir xafiiska dugsiga

Hennepin School Staff Directory

Department Title	Name	Email
Executive Director	Dr. Julie Henderson	jhenderson@hennepinschools.org
Chief Academic Director/K-8 Principal	Dr. Asif Mehmood	amehmood@hennepinschools.org
Operations Director	Yusuf Mohamed	yusufm@hennepinschools.org
Human Resources Coordinator	Chris Antoine	cantoine@hennepinschools.org
Middle School Assistant Director	Halimo Roble	hroble@hennepinschools.org
Special Education Director	Gigi Krause	gkrause@indigoed.org
Due Process Coordinator	Yassin Mahmud	ymahmud@hennepinschools.org
Special Education Coordinator/Coach	Anne Barnes	abarnes@hennepinschools.org
Assistant Director of Operations	Amal Mohamed	amohamed@hennepinschools.org
Building/Grounds Manager	Juan Palma	jpalma@hennepinschools.org
Building/Ground Associate	Carlos Palma	cpalma@hennepinschools.org
Buildings and Grounds Associate, Night Crew	Celia Arroyo de Bazan	celia@hennepinschools.org
Buildings and Grounds Associate, Night Crew	Augustin Bazan-Bazan	agustin@hennepinschools.org
K-4 Dean of Students	Guled Guulleed	gguulleed@hennepinschools.org
5-8 Dean of Students	Madar Mohamed	madarm@hennepinschools.org
School Health Office Assistant/Nutritionist	Maryam Abdi	maryama@hennepinschools.org
Finance Associate	Terri Privette	tprivette@hennepinschools.org
5-8 PHY ED and Afterschool Program Coordinator	John Slavik	jslavik@hennepinschools.org
Assistant Office Manager	Aisha Ali	aali@hennepinschools.org
Assistant Office Manager	Abrianna Armenta	aarmenta@hennepinschools.org
Information Technology	Mubashir Tariq	mtariq@hennepinschools.org
K-4 Instructional Coach	Mellodee Anderson-Rush	mrush@hennepinschools.org

K-4 Instructional Coach	Kim Knuttila	kknuttila@hennepinschools.org
5-8 Instructional Coach	Samantha Vogel	svogel@hennepinschools.org
<i>The Elementary School Teaching Staff (Lower School)</i>		
Department Title	Name	Email
Kindergarten	Zhanar Bissenova	zbissenova@hennepinschools.org
Kindergarten	Joma Glenn	jglenn@hennepinschools.org
Kindergarten	Kathy Shapiro	kshapiro@hennepinschools.org
Kindergarten	Adele Inferrera	ainferrera@hennepinschools.org
First Grade	Claire Gussel	cgussel@hennepinschools.org
First Grade	Sumaia Nur	snur@hennepinschools.org
First Grade	Zoe Graham	zgraham@hennepinschools.org
Second Grade	Christina Nosser	cnosser@hennepinschools.org
Second Grade	Madelynn Vulcan	mvulcan@hennepinschools.org
Second Grade	Aarin Ledford	aledford@hennepinschools.org
Third Grade	Allison Gillett	agillett@hennepinschools.org
Third Grade	Rachel Losness	rlosness@hennepinschools.org
Third Grade	Maya West	mwest@hennepinschools.org
Fourth Grade	Sylvie Dosseh	sdosseh@hennepinschools.org
Fourth Grade	Marianna Sarkozi	msarkozi@hennepinschools.org
Fourth Grade	Maderine Ramos	mramos@hennepinschools.org
ELL	Tiffany Cannon	tcannon@hennepinschools.org
ELL	Kristin Nordvold	knordvold@hennepinschools.org
ELL	Gunnar Christian	gchristian@hennepinschools.org
K-4 Intervention	Kari Stephens	kstephens@hennepinschools.org
K-4 Intervention/SPED	Beth Silverstein	bsilverstein@hennepinschools.org
K-4 Special Education	Lucy Pinataro	lpinataro@hennepinschools.org
K-8 Social Worker	Salma Sheikhibrahim	ssheikhibrahim@hennepinschools.org
K-4 Physical Education	Eric Hensel	ehensel@hennepinschools.org
Media Specialist	Joe Tarter	jtarter@hennepinschools.org
<i>The Middle School Teaching Staff (Upper School)</i>		
Department Title	Name	Email

5-6 Science	Maggie McGann	mmcgann@hennepinschools.org
5-6 English Language Arts/ Lead Teacher	Christina Lacina	clacina@hennepinschools.org
5-6 Mathematics	Dorcas Manu	dmanu@hennepinschools.org
5-6 Social Studies	Theodore Duncan	tduncan@hennepinschools.org
7-8 Science/Lead Teacher	Aaron Aldridge	aaldrige@hennepinschools.org
7-8 English Language Arts	Meg Volgren	mvolgren@hennepinschools.org
7-8 Mathematics	Christian Ritual	critual@hennepinschools.org
Math Intervention	Mohamed Mohamed	mmohamed@hennepinschools.org
ELL	Mohamad Aldarawany	maldarawany@hennepinschools.org
ELL/Reading Intervention	Shawn Khursheed	skhursheed@hennepinschools.org
5-8 Art	Symone Platania	splatania@hennepinschools.org
5-8 Physical Education/Afterschool Program Coordinator	John Slavik	jslavik@hennepinschools.org
Special Education, SUN Room	Kaj Fjelstad	kfjelstad@hennepinschools.org
Special Education	Marcie Anderson	manderson@hennepinschools.org
K-8 SPED Social Worker	Mahdi Nur	mnur@hennepinschools.org
K-8 Speech Therapy	Carrie Raymo	craymo@hennepinschools.org
K-8 Occupational Therapy	LeeAnn Mateffy	lmateffy@hennepinschools.org

2024-2025 SCHOOL BOARD OF DIRECTORS

Dr. Charlayne Myers, *President and Chair*

cmyers@hennepinschools.org

Kaltun Abdi, *Vice President*

kabdi@hennepinschools.org

Christina Lacina, *Treasurer*

clacina@hennepinschools.org

John Slavik, *Secretary*

jslavik@hennepinschools.org

Mahdi Nur, *Director*

mnur@hennepinschools.org

Khalid Omar, *Director*

@hennepinschools.org

Open Position, Parent Representative, *Director*

@hennepinschools.org